

SANAD DUGSIYEEEDKA 2019–2020

Gacaliye Waalidiinta/Masuuliyiinta Carruurta:

Miyaad ogtahay in ardaygaagu ay ka heli karo **Daryeel Caafimaad** dugsiga? Robert Eagle Staff Middle School waxuu leeyahay Xarun Caafimaad oo Dugsiga ku Salaysan Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga Kutaala (SBHC, school-based health center) taas oo ku taal dhismaha oo ay adeegyadeeda ay heli karaan dhammaan ardaydu. SBHC waxa ka shaqeeya Neighborcare Health, xarunta caafimaadka bulshada oo u adeegta in ka badan 75,000 oo qof oo deggan Seattle iyo Vashon Island sannad kasta.

SBHC waxay bixisaa goobta saaxiibtinimada cunuga iyo dhammaan adeegyada dhakhtarka qoys ayagoon kabixin dugsiga. SBHC waxay bixisaa ballanada kahor dugsiga, muddada dugsiga lagu jiro iyo dugsiga kadib. Neighborcare Health waxa ka go'an abuuritaanka guri ah daryeel caafimaad iyo ku dhiiri galinta xdhiidh aad u dheer oo u dhaxeeya bukaanada yo bixiyayaasha oo ay ku jiraan dawaynta, daryeelka caafimaadka maskaxda iyo ilkaha.

Si loo isticmaalo adeegyada SBHC, fadlan dhammaystir oo saxeex foomamkan soo socda ee ku jira baakadan:

- Foomka Taariikhda Caafimaadka (bogga. 2)
- Foomka Isdiiwaangalinta (bogaga. 3-4)
- Foomka Oggolaanshaha (bogga. 5)
- Siidaynta Macluumaadyada Waxbarasho (Bogga. 7) (Qasab maaha)

Foomamka waxa lagu soo celin kartaa baakada dugsiga ama loogu soo diri karaa boostada dugsiga si gooni ah. Waxay sidoo kale keeni karaan shaqsi ahaan SBHC ama xafiiska weyn ee dugsiga.

Siidaynta dhammaystiran ee foomka macluumaadka waxbarasho waxa ay u ogalaanayaan in diiwaanka dugsiga ilmahaaga lala wadaago Neighborcare Health. Oggolaanshahaaga diiwaanada dugsigu waxa ay u ogalaanaysaa Neighborcare Health inay la shaqayso macalimiinta iyo shaqaalaha si loo horumariyo waxbarashada ardayga, joogitaanka, heerarka iyo dabeecada.

Neighborcare Health waxa ka go'an inay u adeegto dhammaan bukaanada iyadoo aanu eegin awooddooda lacag-bixinta. Robert Eagle Staff Middle School SBHC waxay ka heshaa taageero Canshuurta Waxbarashada iyo Qoysaska, laakiin lacag siintani si buuxda uma daboosho kharashaadka howlgalka barnaamijka; sidaa darteed SBHC waxay soo diri doontaa biilka caymiska marka ay suuraggal tahay. Fadlan dhammaystir qaybta caymiska ee foomka diiwaangalinta si aan u hubinno inaan hayno macluumaadkaaga caymiska ee ugu danbeeyay.

Haddii aanad lahayn caymis caafimaad, SBHC waxay kaa caawin kartaa inaad isdiiwaangaliso qorshaha caymiska. Fadlan sax "No Insurance" (Maya caymiska) sanduuqa ku yaal foomka isdiiwaangalinta oo xubnaha shaqaalaha SBHC way ku daba gali doonaan. Waxaad sidoo kale si toos ah u wici kartaa SBHC si aad u codsato caawimaad.

Robert Eagle Staff Middle School waxuu nasiib u helay SBHC oo waxaan rajaynayaa in aad ka heli doonto faa'iidada khayraadkan cunugaada. Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah ama aad uga baahato kaalmo hawl-warqadeedka, fadlan ka wac Robert Eagle Staff Middle School SBHC adoo kawacaay 206-548-5770.

Si daacadnimo leh,

Robert Eagle Staff Middle School

XARUNTA CAAFIMAADKA EE DUGSIGA KU-TAALA FOOMKA TAARIKHDA CAAFIMAADKA ILMAHA



Fadlan buuxi foomkaan si uu nooga caawiyo inaan cunugaaga siino daryeel tayo leh. Cunugaaga waxaa loogu yeeri doonaa xarunta caafimaadka si uu umaro baaritaan caafimaad oo loo baaro miisaankiisa, dheerarkiisa, cadaadiska dhiiga iyo taariikhdiisa dhanka talaalka, loona marsiiyo qiimaynta halista dhanka caafimaadka. Xarunta caafimaadka ayaa kulasoo xariiraysa si ay wax kaaga waydiiso talooyin aad kubiriinayso caafimaadka cunugaaga iyo udiyaar garoowgiisa waxbarashada. Ogolaansho dheeri ah oo uu bixiyo waalidka/masuulka ayaa loo baahan yahay kahor intaan ilmaha lasiin wax talaalo ah. Fadlan laxariir xarunta caafimaadka hadii cunugaagu qabo xaalado caafimaad uuna ubaahan yahay in balan loo qabto.

ARDAYGA	Magaca Hore	Magaca Danbe	Taariikhda Dhalashada / /
	Magaca Daaban ee Qofka Foomka Buuxinaaya	Xidhiidhka Ardayga iyo Qofka (haddii aanu isaga ahayn)	Taariikhda foomka la buuxiyey / /
	Nambarka aleefanka Ugu Haboon ee Lagaasoo wacaayo	Xiliga ugu fiican ee Lagusoo Wacaayo	

SU'AALAHADA KU SAABSAN CUNUGAAGA:

Haa Maya Cunugaadu Ma leeyahay dakhtar dayeel aaasi ama xarun caafimaad?
 Magaca bixiyaha: _____ Xarun caafimaad: _____ Telefoonka: _____

Haa Maya Cunugaaga miyaa lagu sameeyey baadhitaanka caafimaadka jidhka ama baadhitaan dhammaystiran ma lagu sameeyey sannadkii hore?

Haa Maya Cunugaagu ma utagay dhakhtarka ilkaha sanadkii lasoo dhaafay?

Haa Maya Cunugaagu maqaataa wax daawo ama xasaasiyaad kale ah?
 (Faahfaahin ka bixi): _____

Haa Maya Cunugaagu miyuu qaataa wax daawooyin ah? (Oo ay kamid yihiin fiitamiinada iyo daawooyinka aanu dhakhatr u qorin)

Daawooyinka	Qiyaasta daawooyinka	Sababta

Haa Maya Cunugaagu maqabaa dhibaatooyin joogto ah oo caafimaad ama dhibaatooyin caafimaad oo hadda jira?
 (Faahfaahin ka bixi): _____

Haa Maya Cunugaaga waligiis maladhigay isbitaal ama qaliin magalay?
 (Faahfaahin ka bixi): _____

Haa Maya Cunugaagu maqabaa baahiyo dhanka dugsiga/waxbarashada ah ama walaacyo?
 Dhibaatooyin dhanka xaadirista ah Buundooyinkiisa oo kasii dara ama sii dhacaaya Waxbarashada Gaarka ah
 Midkale: _____

Haa Maya Walaacyo kale makaqabtaa faya qabka cunugaaga (tusaale, walwal badan, istarees, niyad jab, walaac, iwm.)
 (Faahfaahin ka bixi): _____

SU'AALAHADA KU SAABSAN QOYSKAAGA:

Ayaa ku nool gurigiina?
 Haddii cunugaagu sidoo kale kunool yahay guri kale, yaa halkaas kunool?

Haa Maya Miyey jireen wax isbadalo waaweyna ama carqalado oo qabsaday qoyskaaga sannadkii hore?
 Haddii ay haa jawaabtu tahay, faahfaahi: _____

Haa Maya Majiraa qof cunugaaga lanool oo sigaar caba, shiishad, sigaarka elektarooniga ah, ama marijuana?

Haa Maya Walaac makaqabtaa inaysan jiri doonin cunto ama lacag idin kufilan si aad qoyskaaga uquudiso?

Haa Maya Qori miyuu yaalaa gurigaaga? Haday tahay haa, ma xaalad adag baa? Haa Maya

Haa Maya Cunugaagu ma mid aad korsataybaa?

TAARIKHDA CAAFIMAADKA QOYSKA (tigsaar dhamaan meelaha quseeya)

Xubin Qoyska kamid ah	Majiraan Dhibaatooyin La ogayahay	Khamrigel/Maandooriyaasha	Lato xanuunka	Xiiq	Kanser	Dhibaatooyinka Wadnaha	Niyadjab	Macaan	Subug saa'ida ah	Maalkax falluuq	Xanuunka Kalyaha	Xanuunka Dhimirka	Istarooga	Dhibaatooyinka Araga
Hooyo														
Aabo														
Xubin kale Qoyska kamid ah:														
Xubin kale Qoyska kamid ah:														

Majiraan xanuun ama cudur horay qoysku uqabi jiray?

XARUN CAAFIMAAD OO DUGSIGA KUDHEX TAALA FOOMKA DIIWAANGALINTA BUKAANKA



Fadlan si dhamaystiran ubuuxi foomkaan si uu nooga caawiyo inaan cunugaaga siino daryeel tayo leh. Ogolaanshahani waxa uu ahaan doona mid firfircoon sannad ilaa sannad.

Fadlan soo gudbi codsigaaga oo qoraal ah si aad uga laabato ogolaanshaha aad siisay adeegyada.

Fadlan buuxi qaybaha 1-8.

I. MACLUUMAADKA BUKAANKA					
MAGACA UGU DANBEEYA EE Ardayga	Hore	Dhexe	Kii ugu danbeeyay ee Hore	Kan Koobaad ee Ladoortay	
TAARIKHDA DHALASHADA ARDAYGA / /		JINSIGA UU KUDHASHAY <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhadig		JINSIGA HADDA <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhadig <input type="checkbox"/> X	
MACLUUMAADKA AQOONSIGA JINSIGA	<input type="checkbox"/> Jinsi dheeri ah ama Nooc kale _____ <input type="checkbox"/> Dhadig <input type="checkbox"/> Naag Nin noqotay <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Nin Naag Noqday		<input type="checkbox"/> Madoonaayo inaan Sheego <input type="checkbox"/> Qaniis		
DOOKHA GALMADA	<input type="checkbox"/> Labeebsho <input type="checkbox"/> Madoonaayo inaan Sheego <input type="checkbox"/> Naag qaniisad ah, Khaniis ama Nin Raga ugalmooda <input type="checkbox"/> Qof jinsiga kasoo horjeeda jecel		<input type="checkbox"/> Ma aqaano <input type="checkbox"/> Waxkale _____		
MAGACA QOFKU JECELYAHAY	<input type="checkbox"/> lama yaqaano <input type="checkbox"/> Nooc kale	<input type="checkbox"/> Waan diday inaan kajawaabo <input type="checkbox"/> Naagta, Ayada, Waxeed	<input type="checkbox"/> Asaga, ninka, Kiisa <input type="checkbox"/> Ze, Hir	<input type="checkbox"/> Ayaga, Dadka, Waxooda	
CINWAANKA BOOSTADA	GURIGA	CIWAANKA LABAAD (haduu kan hore kaduwan yahay)		Guriga	
MAGAALADA	GOBOLKA	ZIP	MAGAALADA	GOBOLKA	ZIP
WAA MAXAY LUUQADA AAD JECESHAHAY?					
ARDAYGU MAYAHAY MID USOO HALGAMAY WADANKA MARAYKANKA?		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya			
MACLUUMAADKA LAGAALASOO XARIIRAAYO					
Taleefanka AAD JECESHAHAY <input type="checkbox"/> Taleefanka guriga <input type="checkbox"/> Gacanta <input type="checkbox"/> Maalintii		CIWAANKA IIMEELKA SHAQSIGA AH			
TALEEFANKA LABAAD <input type="checkbox"/> Taleefanka guriga <input type="checkbox"/> Gacanta <input type="checkbox"/> Maalintii		DOOKHA FARIIMAHA (mid dooro) <input type="checkbox"/> Fariin qoraal taleefanka gacanta <input type="checkbox"/> Fariin cod ah/taleefanka gacanta oo lagaasoo waco laguugusoo diro <input type="checkbox"/> Taleefanka Guriga in lagaasoo waco <input type="checkbox"/> Waan Diiday			
2. MACLUUMAADKA SHAQSIYADA BUKAANKA					
ARDAYGAAGU MAYAHAY NAAFO AMA CURYAAN? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya		XAALADEE AYAA SIFICAN UQEEXAYSA GURIGAAGA? <input type="checkbox"/> Shaqsi <input type="checkbox"/> Hal haween ah <input type="checkbox"/> Hal nin <input type="checkbox"/> Labo Waalid <input type="checkbox"/> Lama yaqaan			
3. OGAYSIISKA MACLUUMAADKA SIRTA AH					
Waxaan halkaan kaxaqiijinayaa inaan helay Ogaysiiska Xeerarka Macluumaadka Sirta ah ee Neighborcare Health. Waxaan fahmayaa in Neighborcare Health ay ilasoo xariiri karto si ay ii xasuusiso balantayda, natiijoyinka imtaxaanka, dookhyada daawada ama faaiidooyinka kale ee laxariira caafimaadka iyo adeegyada ayadoo igasoo wacaysa taleefanka, fariin qoraal iisoo diraysa, iimeel iisoo diraysa, ama fariin cod ah iireebaysa.					Saxiixayada
4. MACLUUMAADKA XARIIRKA XAALADA DEGDEGA AH					
MAGACA UGU DANBEEYA	MAGACA KOOBAAD		TAARIKHDA DHALASHADA / /	JINSIGA <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhadig	
CINWAANKA		GURIGA	XAIXIDHIIDHKA KALA DHEXEYTA BUKAANKA		
MAGAALADA	GOBOLKA	ZIP	TALEEFANKA		

XARUN CAAFIMAAD OO DUGSIGA KUDHEX TAALA FOOMKA DIIWAANGALINTA BUKAANKA



Badalida foomka ee sii socota.

5. WAALIDKA/MASUULKA (HADII BUKAANKU KAYARYAHAY I8)			
MAGACA UGU DANBEEYA EE WAALIDKA/MASUULKA	MAGACA UGU HOREEYA EE WAALIDKA/MASUULKA	TAARIIKHDA DHALASHADA / /	JINSIGA <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dhadig
CINWAANKA BOOSTADA	GURIGA	XAIXIDHIIDHKA KALA DHEXEYYA BUKAANKA <input type="checkbox"/> Waalidka <input type="checkbox"/> Masuul <input type="checkbox"/> Nooc kale	
MAGAALADA	GOBOLKA	ZIP	TALEEFANKA

6. SU'AALO DHEERI AH (Tigsaar hal jawaab su'aal kasta)			
MA TAHAY QOF BILAA HOOY AH AMA HOOY KUMEEL GAAR AH KUNOOL?	<input type="checkbox"/> Labao Jibaar <input type="checkbox"/> Guri Dawladeed	<input type="checkbox"/> Ma ahi Hooy la'aan <input type="checkbox"/> Hooy	<input type="checkbox"/> Nooc kale <input type="checkbox"/> Wadada
AOONSIGA SHAQAALE SOOGALOOTI AH	Mar kamid ah labadii sano ee lasoo dhaafay, ma ahayd shaqada beerta xiliyada gaarka ah ama soogalootigu isha ugu wayn ee dhaqaalahaaga ama kan qoyskaaga?		<input type="checkbox"/> Guriga La iga Tgaaero oo Rasmi ah <input type="checkbox"/> Kumeelgaar
MA ADEEGSATAA TURJUMAAN?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya		
WAA MAXAY ISIRKA AMA ASALKA QOYSKAAGU?	<input type="checkbox"/> American Indian/Alaska Native <input type="checkbox"/> Native Hawaiian <input type="checkbox"/> Wax kabadan hal isir	<input type="checkbox"/> Asian <input type="checkbox"/> Qoomiyadaha kale ee Pacific Islander <input type="checkbox"/> Masheegaayo	<input type="checkbox"/> Madoow/African American <input type="checkbox"/> Cadaan
MATAHAY HISPANIC AMA HISPANIC-LATINO?	<input type="checkbox"/> Haa, Hispanic ama Latino <input type="checkbox"/> Ma ahi Hispanic ama Latino		
DAKHLIGA	Waa maxay dakhliga guud ee qoyskaga soogala bishii?		\$ BISHII
TIRADA GUUD EE GURIGA KUNOOL	Tirada xubnaha qoyska ee ee lagu sheegay canshuurta dakhliga ee federaalka?		
NAMBARKA ID GA ARDAYGA			

7. CAYMISKA			
MA LEEDAHAY CAYMIS? (Haday tahay haa, fadlan soo bixi kaarkaaga caymiska oo tus qofka jooga xafiiska hore ee soodhawanta.)			<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
Magaca Caymiska Koowaad:		Magaca Kaqaygalaha:	
Xariirka Kala dhaxeeya Qofka caymiska kaqoran:		Taariikhda Dhalashada Caymisaha:	
Nambarka Aqoonsiga/Qorsha:		Nambarka Caymiska (haddii uu jiro):	
Nambarka Kooxda (haddii uu jiro):		Magaca Kooxda (haddii uu jiro):	
Taariikhda Hirgalka:		Telefonka Caymiska #:	

8. SAXIIXA FAAFINTA IYO OGOLANSHAHA		
<p>SHAHAADADA MACLUUMAADKA IYO OGOLAANSHAHA DARYEELKA: Anigu waxaan xaqiijinayaa in macluumaadka sajjilaadda ee aan ku warheliyey Neighborcare Health uu hadda sax yahay, oo waxaan fahamsanahay in wix isweydaaris macluumaad ee aan ulakas u gudbiyaa ay igu keeni karto inaan mas'uul ka no-do khartashka adeegyada la i siiyey oo buuxa. Anigu waxaan fasax u siiyey shaqaalaha Caafimaadka caafimaadka dhimirka, iyo daryeelka lkaha inay sameeyaan daaweynta iyo dabiibka ay u arkaan xirfad ahaan iyo caafimaad ahaan inuu daruuri yahay ama talo ku Avon ciladda iyo daaweynta dhibaataada caafimaad. Anigu waxaan fahamsanahay in daryeelka caafimaad ay bixin doonaan Dhakhtar, Xirfadyahan Kalkaaliso ah, Kaaliye Dhakhtar ama shaqaale kale oo ruqsad u haysta. Waxaan fahmayaa in daryeelka caafimaadka dhimirka uu bixin karo dhakhtarka Dhimirka, Cilmi nafsiga ama shaqaale kale oo ruqsad haysta. Anigu waxaan fahamsanahay in daryeelka ilkaha ay bixin donan Dhakhtarka ilkaha, Xirfadyahanada ilkaha, ardayda ilkaha ama saxada ama tabarucayaal tababaran sida waafaqsan Xeerka Ku-dhaqanka Shaqada Ilaaha ee Gobolka Washington. Oggolaanshahan wuu jiri doonaa ilaa oggolaanshaha lagu buriyo ogeysiis qoraal ah oo ku socda Madaxa Caafimaadka/Ilkaha. Hawshan iyo fasaxiddan waxay ku amaraysaa Neighborcare Health in ay u sii dayn karto sharikadda caymiska, Xarunta Adeegyada Medicare iyo Medicaid (Centers for Medicare and Medicaid Services, CMS) ama Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services, DSHS) wixii macluumaad ay u baahdaan si loo qeexo dheefta la xidhiidha adeegyada. Waxaan halkan ku amrayaa caymiye kasta oo aan qorshe la leeyahay inuu si toosa u siiyo wixii dheef ee qorshayaasha caymiska adeegyada la i-siiyey. Waxaan ogolahay in la bixiyo si buuxda dhammaan kharashyada aanu si buuxda u bixin caymiyaha la igmaday.</p>		
SAXIIXA	XAIXIDHIIDHKA KALA DHEXEYYA BUKAANKA	TAARIIKHDA / /

**XARUNTA CAAFIMAADKA EE DUGSIGA KU-TAALA
 OGGOLAANSHO ADEEGYADA CAAFIMAADKA**



Xarumaha Caafimaadka Neighborcare Health ee Ku-yaala Dugsiga waxay ku yaalaan Dugsiyada Seattle Public Schools iyo Vashon Island School District. Neighborcare Health waa inay haystaan oggolaansho oo ay saxiixeen waalid ama wakiil sharciya kahor intaan la siin adeegyada, marka laga reebo xaaladaha ay sharciyada federaalka iyo/ama gobolku ay u ogol yihiin ardayga in u helo daaweynta caynkaas ah iyadoo aan oggolaasho laga hayn waalidka/masuulka. Ardayda qasab kuma ahan inay kadiiwaan gashanaadaan xarun caafimaad si ay uhelaan adeegyada ay bixiso kalkaalisada dugsiga.

Waxaan halkan ku codsanayaa oo ugu ogolaanayaa: (halkan hoose kuqor magaca ardayga.)

Magaca Hore	Xarafka Dhexe	Magaca Danbe	Taariikhda Dhalashada / /
-------------	---------------	--------------	------------------------------

inuu helo adeegyada daryeelka caafimaadka jira iyo kuwa daruuri ay u arkaan shaqaalaha Neighborcare Health ee Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga Kutaala (SBHC, school-based health center). Adeegyadan waxa soo raaci kara, hase ahaatee aan ku koobnayn, la talinta caafimaadka maskaxda, baaritaano caafimaad oo joogto ah, naturopathy, jimicsiyo isboorti, daryeel da'yarta oo hufan, qiimeynta iyo daaweynta cudurada daran iyo dhaawacyada, tallaalada, daraasadaha iyo eegidda dhiigga, sawirada, raajada iyo adeegyada caafimaadka ilkaha. Shaqaalaha SBHC waxay dhiirgeliyaan ka qaybqaadashada qoyska ee daryeelka ay siiyaan ardayda. Hase ahaatee, haddii aanan joogin, anigu waxaan oggolaansho ku bixinaya in ardayga uu helo adeegyada. Oggolaansho waxa waliba la siinayaa in loo gudbiyo daryeel iyo haddii loo baahdo, qaadis xaalad degdegga dhakhaatiirta kale, xirfadlayaal daryeel caafimaad, isbitaal, meelaha baarista, ama hay'adaha daryeelka caafimaad haddi ay sidaa gartaan oo ay la noqoto lagamamaarman Xarunta Caafimaadka Neighborcare Health iyo SBHC shaqaalaheeda. Oggolaanshahaan ma ogolaanayo in adeegyo la bixiyo oggolaansho la'aanta ardayga, iilaa inaan ardaygu karayn in u golaansho baxsho mooyaane. Neighborcare Health waxa ka go'an abuuritaanka guri bixiya daryeel caafimaad oo ay kujiraan caafimaadka, daryeelka ilkaha iyo daryeelka caafimaadka dhimirka Neighborcare Health na waxay dhiiri galisaa xariirka mudada fog ee udhaxeeya bukaanada iyo adeeg bixiyaasha. Neighborcare Health waxa ay la shuraakowday bixiyayaal kale oo ku jira bulshada kuwaas sidoo kale u arka kara bukaanada aan u adeegno si ay u hubiyaan daryeelka in la isku duway.

Sida waafaqsan sharciga gobolka iyo/ama federaalka, marka oggolaansho loo bixiyo daryeel, macluumaadka daryeelka caafimaad waa qarsoodi. Waxyaabaha qaar ayaa reeban; tusaale ahaan:

1. Oggolaansho waxaa lagu bixiyay macluumaad saxeexan oo u bixiyay bukaanaka ama waalidka/wakiilka.
2. Haddii bukaanu muujinayo khataraha waxyeello ku keenaya qofka ama kuwa kale.
3. Bukaanu waxaa uu qabaa dhibaato caafimaad oo nololaha halis ku ah oo uu ka yar yahay 18 sanno jir.
4. Ay jirto sabab looga shakiyo gaboodfal ama daayacaad.
5. Cudurada lakala qaado ama la isku gudbiyo qaarkood, waxaa loo baahan yahay in loo sheego ama loo gudbiyo maamulka caafimaadka guud ee dadweynaha.

Oggolaanshaha waxa loo bixinaya in lala wadaago macluumaadka daruuriga ah dhammaan bixiyayaasha daryeel caafimaad ee SBHC Xarunta Caafimaadka, oo ay ku jirto macluumaad isweydaarsiga ka dhexeeya la taliyaha caafimaadka maskaxda, kaaliyaha caafimaad ee howlgalka iyo kaaliyaha caafimaad ee dugsiga si loo siiyo daryeelka caafimaad ee ugu wanaagsan ardayga kor ku magacaaban. Si loo sahlo iskudubaridka daryeelka, xogta ardayga ee SBHC Ku-taal waxa heli kara shaqaalaha SBHC ee Neighborcare Health. Oggolaansho waxa la siiyey kalkaalisada dugsiga si ay u bixiso daaweynta aan dhakhtar qorin (tusaale, Ibuprofen, Tylenol, Tums, iwm.) sida uu u qoray dhakhtarka SBHC.

Ardaydu waxa kale oo ay ka heli karaan adeegyo caafimaad si madaxbannaani ah kiliinigiya Neighborcare Health ee kasta. Marka oggolaanshahaan lahel, adeegyada waxaa laga heli karaa mid ka mida xarumaha caafimaadka Neighborcare Health ee soo socda. Si aad u aragto liiska xarumaha caafimaadka, fadlan booq websetkena oo ah neighborcare.org. Si aad balan uqabsato, wac xarunta Xariirka Bukaanaka ee Neighborcare adoo wacaaya 206-548-5710.

Oggolaanshaha waxa la siiyay adeegyada la bixiyo Neighborcare Health inta lagu da jiro wakhtiga ardaygu is qoray Dugsi ah Neighborcare Health SBHC ama wakhtiga adeegyada la siiyay farmasii kale oo ah Neighborcare Health. La noqoshada oggolaanshahaan waxa la sameeyn karaa wakhti kasta iyada oo loo qorayo SBHC.

Saxeexa Ardayga: (Waxaa laga doonayaa ardayda jira 13 iyo kuwa kasii wayn)	Taariikhda: / /
Saxeexa Waalid/Masuulka:	Taariikhda: / /
Magaca Wakiilka Masuulka ee Sharciya (Daabac):	Xidhiidhka:

MACLUUMAAD MUHIIMA OO DHEERAADA OO LAXARIIRA OGGOLAANSHAHU CARUURTA

Sida waafaqsan Sharciga Gobolka Washington, SBHC waxay siin oo ka gargaari ardayda helitaanka daryeel dibedda ah haddii loo baahdo. Sida waafaqsan Sharciga Gobolka Washington, dhalinyartu si madaxbannaan ayey u heli karaan daryeelka caafimaadka dhalimada da' kasta iyada oo aan oggolaansho la'aan waalid/wakiil. Dhalinyarada (da'da 13 iyo ka weyn) waxay si madaxbannaan u heli karaan adeegyada alkoolada iyo daroogada iyo latalinta caafimaadka maskaxda iyadoon la helin oggolaanshaha waalidka/wakiilka. SBHC waxay ku dhiirgelisaa arday kasta inuu waalidka ama wakiilka la socodsiiyo go'aannada daryeelka caafimaad markii ay suuragal tahay. Markii ay munaasab tahay, SBHC waxay ka gargaari ardayga kala hadalka xaaladahaas waalidka/wakiilka.

Iyada oo dhalinyartu ay bixin karaan oggolaanshaha daaweynta, oggolaanshahoodu sharci ahaan waxa looga baahan yahay ruqsada macluumaadka la xidhiidha uurka iyo cudurada galmada ku faafa (oo ay ku jirto HIV/AIDS testing). Oggolaanshaha ardayda 13 jirka iyo ka weyn, iyo oggolaanshaha ka imid waalidka/wakiilka ardayga da'diisu tahay 12 ama ka hooseeya waxa uu si sharci ah ugu baahan yahay fasixada macluumaad ku saabsan alkahoolka iyo daroogooyinka ama latalinta caafimaadka maskaxda. Wixii macluumaad dheeri ah oo laxariira oggolaanshaha caruurta booqo: www.washingtonlawhelp.org kadibna baar "Minor Consent (Oggolaansaha Caruurta)."



**Urur ku Salaysan Bulshada
Foomka Ogolaanshaha Waalidka/wakiilka
Ansixinta 2019-2020**

Public Health – Seattle & King Degmada
Barnaamij Kusalaysan Ka qaybqaadashada-Dugsiga
401 5th Ave #1000
Seattle, WA 98104
206.263.8350

Neighborcare Health
1200 12th Ave S, STE 901
Seattle, WA 98144-2712
206-461-6935

**Ogolaanshaha Siidaynta Macluumaadka Waxbarashada ee Hoostimaada Qoyska
Xuquuqda Waxbarashada iyo Xeerka Asturnaanta (Education Rights and Privacy Act, FERPA)**

Waxaan ogolahay u fasaxaada macluumaadka waxbarashada ee ilmahayga ee Dugsiga Degmada Seattle wakaaladaha kor ku xusan. Waan fahamsanahay in macluumaadka waxbarashada ay ku jiraan, oo aanay laakiin ku xadidnayn:

1. Magaca ardayga, Taariikhda Dhalashada iyo macluumaadka lagala soo xidhiidhayo
2. Tirakoobka ardayga: oo ay ku jiraan Heerka Waxbarashada Gaarka ah iyo Heerka 504 iyo midabka/jinsiyada
3. Taariikhda Imaanshaha
4. Taariikhda Edaabta
5. Taariikhda Waxbarashadiisa iyo Darajadiisa
6. Taariikhda Darajooyinka Imtixaanada
7. Taariikhda Diiwaangelinta
8. Dhibcaha Waajibka
9. Waajibyada Soo socda & Kuwa useegay

Siideyntaan waxaa ku jira in fasax loo siiyo shaqaalaha hayada inay heli karaan macluumaadka waxbarashada cunuga iyagoo isticmaalaya habka atomatikada ee macluumaadka looga helo Dugsiga Degmada Seattle.

Anigu waan fahmay ujeedada loo wadaagayo rekoorkani inay tahay in hayadaha kor lagu soo sheegay ay helaan warbixinta cunugayga ee xarunta caafimaadka ee iskuulka ku taal iyo/ama dhaqtarka caafimaadka maskaxda loona sheego warbixintiisa barnaamijka waxbarashada iyo horumarkiisa. Iyada oo laga wadashaqaynayo Caafimaadka Bulshada - Seattle & King County, shaqaalaha Neighborcare Health waxa ay la shaqayn doonaan ilmahayga iyo/ama dugsigiisa/ keeda si loogu dadaalo si loo hagaajiyo guusha ilmahayga ee dugsiga. Waxaan ogahay in aan diidi karo ogolaanshahan aniga oo u diraya ogaysiis qoraal ah Dugsiga Degmada ee Seattle & Waaxda Ka qaybqaadashada bulshada, MS: 33-160
P.O. Box 34165 Seattle, WA 98124.

Siidaynta macluumaadkan waxay ka dhigi doontaa macluumaadka waxbarashada ee kor ku taxan, kuwaas oo ay ku jiraan xogta taariikhiga ah ee ardayga, kuwo ay heli karaan shaqaalaha wakaaladu laga bilaabo taariikhda ogolaanshaha saxeexa ilaa December 31, 2020. Anigu waxaan u ogolaaday inuu Dugsiga Degmada Seattle siin karo macluumaadka wakaaladaha kor ku taxan (fadlan si cad u daabac):

Saxeexa Waalidka/Koriyaha (hadii uu 17 jir yahay ama kayar yahay):	
Magaca Daabacan ee Waalidka/Ilaaliyaha:	
<i>Saxeexa Ardayga (Haddii uu yahay 18 ama ka wayn yahay):</i>	
Taariikhda Maanta:	
Qor Magaca Ardayga (Koobaad iyo kan ugu danbeeya)	Taariikhda Dhalashada Ardayga
**ID ga ardayda ee Dugsiga Degmada	Dugsiga Ardayga
<small>**Aqoosiga Ardayga # waxaa laga heli karaa Kaarka ASB ee ardayga, kaarka warbixinta, waraaqaha ay iskuulku soo diraan, ama in lala soo xiriirro iskuulka ardayga</small>	

OGAYSIISKA DHAQANADA GAAR AHAANSHAHA

OGAYSIISKAN WAXA UU SHARAXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO OO LOO SHAACIN KARO. WUXUU KALOO SHARAXAA SIDA AAD ADIGA U HELI KARTID MACLUUMAADKAAN. **FADLAN SI TAXADIR LEH U FIIRI.**

Neighborcare Health waxay ballan ku hbqaadaysaa inay ku siiso daryeelka ugu tayada sareeya gudaha deegaan ilaaliya gaar ahaanshahaaga iyo xil qariska macluumaadkaaga caafimaadka. Gaadhida hadafkan, ogaysiiskan waxa uu sharaxayaa dhaqanadayada gaar ahaanshaha, siiba xuquuqahaaga, ku saabsan macluumaadkaaga caafimaadka.

Cidda raaci doonta dhaqanada gaar ahaanshaha gudaha Ogaysiiskan
Dhaqanadan gaar ahaanshaha lagu faahfaahiyay Ogaysiiskan waxaa raaci doona dhammaan xirfad yaqaanada daryeelka caafimaadka, shaqaalaha, tababarayaasha, ardayda iyo mutadawiciinta Neighborcare Health.

Isticmaalada iyo Shaacinaha macluumaadka Caafimaadkaaga Oggolaansho la'aan

Waxaanu isticmaali karnaa ama u shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka la'aanta oggolaanshahaaga dadka soo socda, ama ujeedooyin kale la oggolaaday ama sharcigu u baahanyahay, ay ka mid tahay:

Daawaynta

Waxaanu isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka sida lama huraanka ah si aanu kuu siino daawayn ama adeegyo. Tusaale ahaan, waxaanu u isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aanu kuu siino daryeelka caafimaadka adiga, oo waxaanu la tashan karnaa adeeg bixiyaasha kale ee daryeelka caafimaadka wixii ku saabsan daawayntaada.

Lacag bixinta

Waxaanu isticmaali karnaa oo shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka markaad daawaynta aadka hesho Neighborcare Health biil ayaa la soo diri karaa oo lacag bixinta lagaa qaadaa adiga, shirkada caymiska, ama koox saddexaad oo kale. Tusaale ahaan, waxaanu la wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si loo codsado lacag bixin oo looga helo lacag bixin caymiyahaaga caafimaadka, oo loo xaqiijiyay caymiyahaaga caafimaadka inuu bixin doono daawayntaada.

Hawlgalada Daryeelka Caafimaad

Waxaanu isticmaali karnaa ama shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si loo fuliyo qaybo maamul, dhaqaale, sharci iyo hawlaha horumarinta tayada lama huraanka u ah in la wado ganacsigayaga iyo in la taageero

hawlahayaga daawaynta iyo lacag bixinta. Tusaale ahaan, waxaanu isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka si aanu u qiimayno tayada adeegyadayada ee adiga lagu siiyo iyo si loo qiimeeyo wax qabadka shaqaalahayaga adiga ku siinaya daryeelka.

Is dhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka (HIE)

Waxaanu ka qayb qaadan karnaa is dhaafsiga macluumaadka caafimaadka gaakar ah halka aanu u shaacin karno macluumaadkaaga caafimaadka, sida uu sharcigu oggolyahay, adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee kale ama hay'adaha daawaynta, lacag bixinta, ama ujeedooyinka hawlgalada daryeelka. Is dhaafsiga macluumaadka caafimaadka waxa uu bixin karaa helida degdeg ah, isku dubarid ka wanaagsan oo daryeelka ah oo waxa uu ka caawiyaa adeeg bixiyayaasha iyo saraakiisha caafimaadka dad waynaha inay gaadhaan go'aan aad looga warqabo.

Qaban qaabada Daryeelka Caafimaadka Abaabulan

Waxaanu ka qayb geli karnaa habbayn wada jir ah oo lala sameeyo adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka kale ama hay'adaha daryeelka caafimaadka halka aan isticmaali karno ama shaacin karno macluumaadkaaga, sida sharcigu oggolaaday, si looga qayb galo hawlaha wada jirka ah ee ku lugta leh daawaynta, dib u eegida go'amada daryeelka caafimaadka, qiimaynta tayada ama hawlaha horumarinta, ama hawlaha lacag bixinta

Hawlaha Lacag ururinta

Waxaanu u isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaadka ujeedooyinka lacag ururinta ururkayaga, ay ku jiraan u shaacinta macluumaadka ururka na metelaya si lacag lo urursho. Wada xidhiidh kasta oo adiga ah oo ku saabsan lacag ururinta waxa uu ku siin doonaa fursad cad si aan loo dooran hawlaha lacag ururinta ah oo dheeraad ah.

Isticmaalada dheeraadka ah iyo shaacinaha macluumaadka caafimaadkaaga oggolaansho la'aan

- Sida sharciga gobolka iyo federaalku u baahanyahay.
- Si laguula soo xidhiidho xusuusiyaha ballanka, lagu siiyo natiijoyinka baadhida, laguugu wargeliyo adiga waxa ku saabsan ikhtiyaarada ama talada

adiga ku saabsan caafimaadka kale ee la xidhiidha dheefaha iyo adeegyada.

- Kooxaha saddexaad ee lagu tixraacay sida "shuraakada ganacsiga" ee ku bixiya adeega iyagoo na metelaya, sida biil bixinta, dayactirka sooftiweeka iyo adeegyada sharciga.
- Si loogu shaaciyay macluumaadka daryeelka caafimaadka ee adiga kugu saabsan cilmi baadhayaasha caafimaadka diyaarinaya si ay u qabtaan mashruucyo caafimaad.
- Si looga hortaggo ama loo yareeyo khatarta mustaqbalka ku dhici karta caafimaadkaaga iyo badbaadada ama qof kale.
- Ku socota ciidanka haddii aad xubin ka tahay xooggaga ciidanka oo waa naloo oggolyahay ama waxaa sidaa nooga baahan sharciga.
- Saraakiisha federaalka loo xil saaray wixii ah sirdoonka, ku lid ah sirdoonka ama hawlaha kale ee amniga qaranka.
- Saraakiisha federaalka loo xil saaray markaas waxay samayn karaan baadhitaano gaar ah ama bixin karaan ilaalinta Madax waynaha Maraykanka ama qof kale oo loo xilsaaray.
- Saraakiisha sharci fulinta sida loo xil saaray ama sharcigu u baahan yahay.
- Magdhowga shaqaalaha ama barnaamijyada la midka ah ee bixinaya dheefaha dhaawaca shaqada la xidhiidha ama jirrada.
- Dhacdada masiibo dhacdo, ururada ka caawinaya dedaalada samatabixinta masiibada markaas qoyskaagu waxaa lagu wargelin karaa xaaladaada iyo goobta.
- Sarkaalka baadha dhimashada, baadhayaasha caafimaadka iyo habbeeyayaasha aaska, sida la oggolaaday ama sharcigu u baahanyahay ee lama huraanka u ah iyagu inay u gutaan waajibkooda.
- Haddii aad tahay qof xubin ku deeqa, ururada wax ka qabta helida xubintan ama xubin jidh ku beerida ama kaydka xubinta, sida lama huraanka u ah inay ka caawiyaan helida xubinta, ku beerida xubinta ama ku deeqida.
- Ee wakaaladaha dowladda, ruqsad bixinta, hanti dhowrka iyo qiimaynta.

- Hay'adaha xabsiga sida la oggolaaday ama uu sharci u baahanyahay haddii adigu aad tahay maxbuus ama aad ku jirto haynta xabsi ee saraakiisha sharci fulinta.
- Masuulada caafimaadka dad waynaha ee hawlaha caafimaadka dad waynaha. Hawlaha caafimaadka dad waynaha waxaa ka mid ah ka hortagga ama xakamaynta cudurada, dhaawaca, naafanimada, iyo ka jawaabida warbixinaha xad gudubka, dayaca ama ku xad gudubka xubin qoyska ah. Waxaanu shaacin karaan macluumaadka caafimaadka ee qofka ama wakaalada looga baahan yahay inay ka warbixiso dhacdooyinka aan wanaagsanayn, ceebta alaabtu leedahay ama dhibaatooyinka, leexsanaanta bayolojiyeed ee alaabta, ama xusuusinta laabta, dib u samaynta ama beddelida.
- Maxkamadaha iyo qareenada marka aynu helno amar maxkamadeed, yeedhmo maxkamadeed ama tilmaamo kale oo sharci oo ka soo baxay maxkamadahan ama guddiyada dad waynaha ama in aynu nafaheena ka difaacno dacwad la inagu soo oogay

Isticmaalada iyo Shaacinaha macluumaadka Caafimaadkaaga Oggolaanshaha leh

Isticmaalka iyo Shaacinaha u Baahan Oggolaanshahaaga Qoran:

- Qoraalada daawaynta maskaxda: Ma shaacin doono qoraalada daawaynta maskaxda iyaddoon lahayd oggolaanshahaaga qoran iyaddoo isticmaalka iyo shaacinta haddii kale uu sharci oggolaado ama sharci u baahan yahay mooyaane.
- Suuq gaynta: Kama qayb qaadan doono shaacinaha ka dhigan iibka macluumaadkaaga caafimaadka iyaddoo lahayn oggolaanshahaaga qoran mooyaane. Iibka macluumaadka caafimaadka ee ilaashan (protected health information, PHI) waxa uu dhacaa marka anaga. ama qof aanu qandaraas siinaa si toos ah ama aan toos ahayn, u helo lacag bixinta is dhaafsigu macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaashan.
- Dadka da'da yar: Waxaanu raaci doonaa sharciga Gobolka Washington marka aanu isticmaalayno ama wadaagayno PHI dadka da'da yar. Ilmaha qaata adeegyada daryeelka caafimaadka ee la xariira HIV/AIDS; STD, daweynta caafimaadka madaxa, baarista qamrada/mukhadaraadka, iyo daweynta ama caafimaadka dhalmada waxay codsan karaan in qof kale oo iyaga matalo in uu qaado macluumaadkaas. Haddii cunugga usaan qofna siinin ruqsad qoran, waxaan macluumaadka siin doonaa oo keliya cunugga.

Isticmaalada Kale iyo Shaacinaha
Codsiyada lagu raadinaayo macluumaadka marka laga reebo kuwa ku sifeysan

Ogeysiiskan waxay u baahan doonaan ruqsadaada qoran. Tusaale ahaan, waxaad u baahan tahay in aad qortid foomka ruqsadda ka hor inta aadan PHI u dirin shirkadda ceymiska nafta ama qareenkaada. Waad la noqon kartaa ruqsadaada waqti kasta marka aad na siisid codsi qoran.

Xuquuqahaaga Gaarka ah

Xaqa in La baadho oo La koobiyaysto Diiwaanada

Waxaad codsan kartaa inaad aragto diiwaanadaada caafimaadka iyo diiwaanada lacag bixinta si loo baadho iyo/ama loo codsado koobiyada diiwaanada. Dhamaan codsiyada lagu fiiriyi diiwaanka waa in la soo qoro. Sida hoos timaado xaaladaha qaar, waxaa dhici karto in aan diidno in la helo diiwaankaada. Waxaa dhici karto in aan kugu soo dallacno khidmadda samaynta koobiyada iyo dirista diiwaanka.

Xaqa in La codsado Wax ka beddel

Waxaad leedahay xaqa aad ku codsato inaan wax ka beddelno PHI gaaga. Codsigaada waa in uu qoran yahay, iyo waa in uu sharaxo sababta loo baahan yahay in la baddalo macluumaadka. Waxaa dhici karto in aan diidno codsigaada sida hoos timaado xaaladaha qaar.

Xaqa Shaacinaha Xisaabaadka

Waad waydiin kartaa, qoraal ahaan, xisaab kasta noocyo gaar ah oo shaacinaha macluumaadkaaga caafimaadka ah. Sharci waxa uu ka reebaa xisaabta qaar badan oo noocyada shaacinaha ah, sida kuwan loo sameeyay inay ku daryeelan adiga, ay bixiyaan adeegyadaada caafimaadka, ama halka aad ku bixisay oggolaanshahaaga qoran ee shaacinta.

Si loo sameeyo codsiga xisaabta eeg macluumaadka xidhiidhka hoose. Guud ahaan, waxaanu ka jawaabi doonaa codsigaaga gudaha 60 daqiiqadood helida codsigaaga iyaddoon u baahano wakhti dheeraad ah mooyaane.

Xaqa Lagu codsado Xayiraadaha

Waxaad leedahay xaqa aad ku codsato inaanu saarno xayiraado dheeraad ah isticmaalkayaga iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaad, ay ku jiraan isticmaalada iyo shaacinaha lacag bixinta, daawaynta, iyo hawlaga daryeelka caafimaadka, iyo xubnaha qoyska, saaxiibada, ama kuwa kale ee ku lugta leh daryeelkaaga ama lacag bixinta daryeelkaaga. Si loo codsado xayiraad, waa inaad u sheegtaa daryeelahaaga ama la xidhiidhaa Xafiiska Xil qarinta addoo isticmaalaya macluumaadka ku qoran dhammaadka Ogaysiiskan. Waxaa lagu waydiin karaa inaad u soo gudbisno codsigaaga qoraal ahaan. Naloogama baahna inaanu aqbalno codsigaaga. Haddii aanu aqbalno, waxaanu kugu wargelin doonaa qoraal ahaan oo waxaanu sharfi doonaa heshiiskeena iyaddoo macluumaadka loo baahdo mooyaane si lagu siiyo daawaynta degdega ah ama waxaa nalooga baahan yahay ama waxaa oggolaada sharciga in la shaaciy.

Haddii adiga ama xubin kale oo qoyska ah iyagoo ku metelaya ay lacag u siiyiin si buuxda

adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka adeeg daryeel oo caafimaad oo gaar ah ama shay oo si gaar ah u codsadaan inaanu shaacin macluumaadka ku saabsan shay daryeelka caafimaadka ama adeega qorshahaaga caafimaad ee lacag bixinta ama ujeedooyinka hawlaga daryeelka caafimaadka, waanu aqbali doonaa codsigan. Guud ahaan ma xayiri karno shaacinta macluumaadka loogu baahan yahay ujeedooyinka daawaynta daryeelka caafimaadka.

Xaqa lagu Codsado wada xidhiidhka qarsoodiga ah

Waxaad codsan kartaa in aanu kuu soo dirno PHI adiga qaab gaar ah ama goob gaar ah, sida keliya xaga shaqada ama guriga, ama boostadda. Si loo codsado macluumaad qarsoodi ah, fadlan warqad u qor Sarkaalkayaga Xil qarinta cinwaanka hoose oo sheeg sida ama meesha aad jeceshahay in lagugula soo xidhiidho. Kuma waydiin doono sababta codsigaaga, oo waxaanu habbayn doonaa dhammaan codsiyada macquulka ah.

Xaqa Nuqulka Warqadda Ogaysiiskan

Waxaad leedahay nuqulka warqadda ogaysiiskan wakhti kasta. Nuqulada Ogaysiiskan waxaa laga heli karaa dhammaan goobahayaga, websaydkayaga neighborcare.org, ama iyaddoo lala soo xidhiidhayo Sarkaalka Xil qarinta privacy@neighborcare.org.

Xaqa Ogaysiiska Jebinta

Waxaad leedahay xaqa aad ku hesho wargelinaha jebinta macluumaadkaaga caafimaadka sida sharci u baahanyahay.

Isbeddela Ogaysiiskan

Waxaa noo dhowran xaqa aanu ku beddelno dhaqanada oo Ogaysiiskan iyo in laga dhigo Ogaysiiska cusub mid dhaqan gal u ah dhammaan PHI aanu wadno. Haddii aanu sidaas samayno, ogaysiiska la cusboonaysiiyay waxaa la soo geliin doonaa websaydkayaga oo waxaa laga heli doonaa goobahayaga. Marka la codsado, waxaanu ku siin doonaa Ogaysiis kasta oo dib loo eegay adiga.

Su'aalaha iyo Cabashooyinka

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan xuquuqahaaga gaar ahaanshaha, ama aad ka walaacsantahay inaanu ku xad gudubnay xuquuqdaada gaar ahaanshaheeda, waxaad la xidhiidhi kartaa Sarkaalka Xil qarinta Neighborcare Health iimaylkan privacy@neighborcare.org. Waxaad sidoo kale leedahay xaqa aad ugu cabato Xoghayaha Adeegyada Caafimaadka iyo Aadahama. Lagaagama aargoosan doono adiga xarayntaada cabashada.

Neighborcare Health
1200 12th Ave S, Suite 901
Seattle, WA 98144
206-461-6935
neighborcare.org